

Wadaagida warbixintaada lagu hormarinayo daryeelka

Wuqooyiga Galbeed London xirfadlayaasha caafimaadka iyo daryeelka waxay si wadajir ah uga shaqeynayaan in ay ku siiyaan daryeelkaaga. Kuwa ku shaqo leh waxay arki karaan warbixinta lamidka ah ee adiga kugu saabsan, si markaas aad u heshid daryeel la isku daray.

Tani waxay hubineysaa in marka aad soo booqatid dhaqanka Dhaqtarkaaga Guud, isbitaalka, ama aad taageero ka heshid bulshadaada ama guriga, xirfadlaha daryeelkaaga sida Dhaqtarkaaga Guud, dhaqaatiirta isbitaalka, kalkaalisada degmada ama shaqaalaha bulshada waxay hayaan warbixinta saxda ah ee adiga kugu saabsan waqtiga saxda ah.

Faa'idooyinka

Waad kala hadli kartaa xirfadlaha caafimaadkaaga iyo daryeelka la wadaagista warbixintaada laakin halkaan waa qaar kamid ah faa'idooyinka:

- Waxaa kaliya oo aad u baahantahay in aad sheegtid taariiqdaada hal jeer.
- Iska ilaali balamo aan muhiim aheyn iyo imtixaamada.
- Waxaad waxbadan ka qeybqaadan kartaa go'aamada ku saabsan daryeelkaaga.

Taageerida daryeelkaaga

Kaas oo arkayo warbixinta aniga igu saabsan?

- Xirfadlayaasha caafimaadka iyo bulshada sida Dhaqaatiirta Guud (GPs), kalkaalisoooyinka iyo shaqaalaha bulshada si toos ah ula xiriiro daryeelkaaga.
- Shaqaalaha taageerada ee diyaarinayo balamahaaga ama daaweyntaada.
- Iyo ogolaanshahaaga, kooxyada daryeelka bulshada ee kawada hadlaya cudurka, daaweynta iyo daryeelka ee dacwada shirarka ee laguugu siinayo daryeelka ugu wanaagsan

Warbixinta la wadaagay ee adiga kugu saabsan waxaa ku jira:

- Caafimaadka iyo warbixinta fayyo qabka ee la xiriiro daryeelkaaga.
- Lambarka NHS.
- Da'da.

- Sharaxaada xiriirka.
- Qaraabada ku xigto.
- Daawooyinka iyo alaarjiga.
- Balamaha, daaweynta iyo daryeelka.
- Natiijooyinka baaritaanada sida baaritaanka dhiiga, sheeybaarada, Raajada.

Daryeelka taageerayo iyo hormarinayo

Warbixinta qaar iyada oo aan la jirin sharaxaadaada gaarka ah waxaa laga yaabaa in si amni ah lagula wadaago hay'adaha caafimaadka iyo daryeelka bulshada si loo qorsheeyo iyo lagu hormariyo adeegyada bulshada dadka Wuqooyiga Galbeed ee London. Warbixintaan qarsoodiga waxay ku caawisaa qorsheynta iyo waxay bixisaa daryeel. Waxay sidoo kale nagu caawisaa in aan kormeerno tayada adeegyada la bixiyay.

Dooqyadaada

Haddii aad ku faraxsantahay in aad la wadaagtid warbixintaada

- Warbixinta adiga kugu saabsan waxaa lala wadaagaa caafimaadka iyo daryeelka xirfadlayaasha bixinaya daryeelka.
- Warbixinta (iyada oo aan la jirin sharaxaadaada gaarka ah) waxaa loola wadaagay si qarsoodi ah hay'adaha caafimaadka iyo daryeelka bulshada si loo qorsheeyo adeegyada deegaanka iyo daryeelka wanaajinta qofwalba.

Waa warbixin ku saabsan ilaalinteyda?

Warbixinta adiga kugu saabsan waxay ku ilaalsantahay sida waafaqsan Xeerka Ilaalinta Xogta 1998.

- Xirfadlayaasha caafimaadka iyo daryeelka bulshada waxaa kaliya oo ay arki karaan warbixintaada marka ay ku siinayaan daryeel toos ah.
- Warbixinta adiga kugu saabsan LALAMA wadaagayo ama lagama iibinayo hay'adaha gaarka ah.
- Xirfadlayaasha caafimaadka iyo daryeelka waa in ay u xajiyaan diiwanadaada si ilaalsan.

Haddii aadan rabin in aad la wadaagtid warbixintaada, fadlan u sheeg hay'ada caafimaadka ama daryelka ee adigga ku siiso daryeelka.

Waxyaabaha la tixgelinayo

Hamiladeena waa siinta bukaanada kartida ay kula wadaagaan iyo ku xakameeyaan helida diiwaanadooda. Wadaagista warbixintaada waxaa jiro qaar kamid ah sheeyada aan tixgelino:

- Ma ahan in aad la wadaagtid dhammaan diiwanaada; waad xadeyn kartaa waxa la arkayo iyo qofka arkayo.
- Haddii aad siiso helida diiwaanadaada saaxibada ama qoyska, weli waxaad heleysaa dooqa aadku xadeyneysid waxa ay arkayaan.
- Haddii aad la kulantid qalad diiwaankaaga ah, fadlan la xiriir bixiyaha daryeelkaaga sida ugu dhaqsiiha badan oo suurtoogalka ah

Ma rabtaa in aad ogaatid wax badan?

Haddii aad rabtid warbixin badan fadlan:

- La hadal xirfadlaha caafimaadka ama daryeelka ku siiyo adiga.
- booqatid: www.integration.healthiernorthwestlondon.nhs.uk